

# Waxa aan maqalnay



## Social Cohesion Guide

# Soo koobidda waxa aan maqalnay markii aan kala hadeyno bulshooyinka wax ku saabsan social cohesion

Kumushinka Royal ee Xog-wereysiga weerarka argagaxisada ee Christchurch ee 15 Maarso 2019 ayaa soo jeediyey tallooyin sare loogu qaado social cohesion ee Aotearoa New Zealand. Shaqada qeyb ka ah hirgelinta tallooyinkii la soojeediyey ee ku saabsan social cohesion, Wasaarada Hormarinta Bulshada (MSD) ayaa kala hadashay dad badan oo kala duwan iyo bulshooyin sidii loo hormarint laha istratejiyada sare loogu qaadayo social cohesion iyo sidii loo cabiri lahaa ee Aotearoa New Zealand oo dhan. Is xogwareysigan ama ka qeybgaladaan waxay dhaceen inta u dhaxeeyso Luuliyo 2021 iyo Maarso 2022.

Ka qeybqaatayaasha kulamadaan ayaa dhahay waxaa jiro dhibaataada isku xirnaansho la'aan (social cohesion) ee Aotearoa New Zealand oo ka hadlay waaya aragnimada takoorida ama in loola dhaqmo si ka duwan sababtoo ah, jinsigooda, aaminadooda, galmadooda, goobta juquraafigooda iyo kala duwanaansho kale. Dad badan ayaa iskumar la kulma noocyo kala duwan oo takoor ah, taas oo xoojisay waayo aragnimadooda xun. Waxay rabeen in kala duwanaanshahaan la qiimeeyo oo la ixtiraamo, bedelkii la iska indhi tiri lahaa ama wax guud.

Ka qeybqaatayaasha ayaa ka hadlay xiriirka xoogan ee u dhaxeeyo Te Tiriti o Waitangi (Heshiiska Waitangi) iyo social cohesion. Waxaa la aqoonsaday in Te Tiriti o Waitangi ay na bari karaan casharo qiimo leh ee ku saabsan xoojinta social cohesion ee dadkoo dhan ee ku nool


Aotearoa New Zealand, ma ahan kaliya Māori. Ka qeybqaatayaasha ayaa sidoo kale rabo inay arkaan illo badan ama maalgelin loogu talloagalay dadaalada social cohesion.

Qeexida social cohesion ayaa lagala hadlay ka qeybqaatayaasha. Kadib jawaab celintooda, social cohesion ayaa lagu qeexay meesha: Dhammaan dadka, whānau iyo bulshooyinka ku kobcaan, ka mid yihiin oo lagu ixtriraamo Aotearoa. Ka qeybqaatayaasha ayaa si xoogan u taageeray ku darista 'ma mid ahaanshaha', 'ixтираamka' iyo 'sinnaanta' oo qeexida ah.

Lix aagag ee aan ka shaqeyn karno si loo gaaro social cohesion, sida ku saleysan cilmi baarista dhawaan ee ku saabsan social cohesion, ayaa sidoo kale lagala hadlay ka qeybqaatayaasha. Sida xigta jawaab celintooda, lix aagag ayaa loo cusbooneysiiyay sida:

1. takoorida ama si xun ula dhaqanka dadka sababtoo ah kala duwanaanshahooda;
2. fursadaha wanaagsan ee kooxyada kala duwan ku kobcaan iyo ku xirmaan;
3. ka qeybqaadashada howlaha muhiimka ah;
4. fayyo qabka iyo caqabadaha fayyo qabka;
5. ku darista iyo qiyamyada la wadaago;
6. illaalinta bulshadeena iyo deegaanka oo dadka mustaqbalka.

Wadahadalka ku saabsan lixdaan aagag ku daboolan arimo muhiim ah ee sinnaanta, awooda, waxyeelada, aaminaada, kala duwanaanshaha iyo aqoonsiga. Ka qeybqaatayaasha waxay dhaheen mid walba ee lixda aagaga ayaa si simman muhiim ugu ahaa in lagu gaaro social cohesion. Lixda aagaga ee diirada ayaa sidoo kale fullinayo dhameystirka iyo balaarinta shaqada hay'adaha dowlada ee ay horaan u sameynayeen taageerida social cohesion ee Aotearoa New Zealand.



Markii la weydiiyo guushee shaqada social cohesion ayaad jeclaan laheyd, ka qeybqaatayaasha ayaa ka hadlay wax ku saabsan abuurista jawi ka mid ahaansho, sinnaanta, ixtiraamka iyo aaminaada, meesha qof walba uu si firfircoon uga qeybqaadanayo. Jawaab celintaan waa la falanqeyay oo waxaa loo adeegsaday hormarinta qeyb natiijooyinka social cohesion si ay uga caawiso qiimeynta iyo cabirida hormarka ee ku aadan social cohesion.

Jawaab celinta iyo fikradaha ka imaanayo wada sheekeysiyada ama ka qeybgalada kala duwanaanshaha ka qeybqaatayaasha ayaa si weyn u qaabeeyay xeelada lagu hormarinayo social cohesion ee Aotearoa New Zealand.

